

Foojarka

Foojarka Doorashada Barnaamijka Guriyeynta

Waaxda Guryeynta Mareykanka iyo Horumarinta Magaaloooyinka

Lambarka OMB. 2577-0169
(dhacaysa. 04/30/2026)

Xafiiska Guriyeynta Dadweynaha iyo Hindida

Bayaanka Culayska OMB: Culayska warbixinta dadwaynaha ee xog ururintant ayaa lagu qiyasay ilaa 0.05 saacadood, oo ay ku jirto wakhtiga dib u eegista tilmaamaha, raadinta ilaha xogta jira, ururinta iyo ilaalinta xogta loo baahan yahay, iyo dhamaystirka iyo dib u eegista ururinta macluumaadka. Xog ururintant ayaa looga baahan yahay ka qayb qaadashada barnaamijka foojarka doorashada guriyeynta. Ballanqaadyada qarsooni ahaanta laguma bixiyo ururintan. U dir faallooyinka ku saabsan qiyasta culayskan ama dhinac kasta oo kale oo ka mid ah ururinta macluumaadkan, oo ay kamidyihiin taloooyinka lagu dhimayo culayskan, Xafiiska Guriyeynta Dadweynaha iyo Hindida, Maraykanka. Waaxda Guriyeynta iyo Horumarinta Magaaloooyinka, Washington, DC 20410. HUD waxaa laga yaabaa in aysan fulin oo kafaala qaadan, qofkana loogama baahna in uu ka jawaabo, aruurinta macluumaadka ilaa ururinta ay muujiso nambar kontorool oo sax ah.

Bayaanka Xeerka Qarsoonnimada. Waaxda Guriyeynta iyo Horumarinta Magaaloooyinka (HUD) waxaa loo oggolaaday inay soo ururiso macluumaadka foomkan 24 CFR § 982.302 Macluumaadka waxaa loo isticmaalaan in lagu oggolaado qoyska inay raadiyaan qayb u qalma oo wuxuu qeexaya baaxadda qaybta. Macluumaadka ayaa sidoo kale dejinaya waajibaadka qoyska ee hoos imanaya Barnaamijka Xulashada Guriyeynta. Macluumaadka Shakhsii ahaan La Aqoonsan Karo (PII) ee lagu ururiyey foomkan laguma kaydiyo ama laguma soo saaro nidaamka diiwaanka.

Fadlan akhri dukumeentiga oo dhan ka hor intaadan buuxin foomka Buuxi dhammaan meelaha bannaan ee hoose. Si cad u daabac ama Qor.	Lambarka foojarka	
1. Geli cabbirkka qaybta tirada qolalka jiifka. (Tani waa tirada qolalka jiifka ee qoysku u qalmaan, waxaana loo adeegsadaa go'aaminta cadadka caawinta lagu bixinayo magaca qoyska ee mulkiilaha.)	1. Baaxadda Qaybta	
2. Taariikhda Foojarka Labaxshay (mm/dd/yyyy) Geli taariikhda dhabta ah ee Foojarka lasiyyay Qoyska.	2. Taariikhda Labaxshay (mm/dd/yyyy)	
3. Taariikhda dhicitaanka foojarka (mm/dd/yyyy) waa in ay ahaataa ugu yaraan lixdan maal mood kadib taariikhda foojarka labaxshay. (Eeg Qaybta 6-aad ee foomkani.)	3. Taariikh ay Dhacayso (mm/dd/yyyy)	
4. Taariikhda Kordhinta ay Dhacayso (hadday quseyso) (mm/dd/yyyy) (Eeg Qaybta 6. ee foomkan)	4. Taarikhda Kudarista-waqtii ay Dhacayso (mm/dd/yyyy)	
5. Magaca Wakiilka Qoyska	6. Saxiix Wakiilka Qoyska	Taariikhda la saxiixay (mm/dd/yyyy)
7. Magaca Wakaalada Guriyeynta Dadweynaha (PHA)		
8. Magaca iyo Darajada Madaxa PHA	9. Saxiixa Madaxa PHA	Taariikhda la saxiixay (mm/dd/yyyy)

1. Foojarka Doorashada Barnaamijka Guriyeynta

- A. Wakaalada guryantaa dadwaynaha (PHA) waxay go'aamisay in qoyska qoyska kor lagu magacaabay (qeybta 5) ayaa uqalma ka qayb qaadashada barnaamijka foojarka doorashada guriyeynta. Barnaamijkan, qoyska waxay ayaa doorta meel ku habboon oo ammaan ah oo ay ku noolaadaan. Hadii uu mulkiiluhu ku raaco inuu qoyska kaga kireeyo guriga barnaamijka doorashada guriyeynta, oo hadii PHA ay ansixo qaybta, PHA ayaa waxay lagali doontaa mulkiilaha hesiishkha lacag bixinta caawinta guriyeynta (HAP) sifo ay mulkiilaha u siiso lacagbixin bille ah si qoyska ay ugu caawiso kirada.
- B. PHA ayaa go'aamisa cadadka lacag bixinta caawinta guriyeynta ee bishiiba la siinayo mulkiilaha. Guud ahaan, PHA ayaa bixisa cadadka kaalmada guriyeynta bishiiba taas oo lagu xisaabiyo faraqa u dhexeeya heerka lacag bixinta ee lagu dhaqmi karo iyo 30 boqolkiiha dakhliga qoyska ee la hagaajiyay bishii. Si loo go'aamiyo lacagta ugu badan ee caawinta guriyeynta hore ee qoyska, PHA waxay isticmaali doontaa heerka lacag bixinta dhaqangalka taariikhda kirada ay ogolaato PHA. Qoysku waxay dooran karaan inay kiraystaan qeyb ka badan heerka lacag bixinta, laakiin doorashadani waxba kama beddeli doonto lacagta caawinta ee PHA. Qadarka dhabta ah ee lacag bixinta caawinta PHA waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo la isticmaalayo kirada guud ee qeybta ay doorteen qoyska.

2. Foojarka

- A. Markay bixinayso foojarkan PHA waxay filaysaa in haddii qoysku helo qeyb oggolaansho, PHA waxay kadhibi doontaa lacagta diyaar si ay heshiis HAP ula gasho milkiilaha. Si kastaba ha ahaatee, PHA waajib kuma aha qoyska, mulkiile kasta, ama qof kale, si ay u oggolaadaan kireysiga. PHA waxay mas'uuliyad ah kuma laha qolona marka la soo saaro foojarkan.
- B. Foojarku ma siinayo qoyska wax xuquuq ah si ay uga qayb qaataan barnaamijka foojarka doorashada guriyeynta ee PHA. Qoysku waxay noqdaan ka qaybqaatayaasha barnaamijka foojarka doorashada guriyeynta ee PHA marka heshiiska HAP ee u dhexeeya PHA iyo mulkiilaha uu dhaqan galoo.
- C. Inta lagu jiro xilliga hore ama wakhti kasta oo la dheereeyey ee foojarkan, PHA waxa laga yaabaa inay u baahato qoyska inay ka warbixiyaan horumarka laga gaaray kirayashada qeybta(guriga) kawakhti ahaan iyo sida ay go'aamisay PHA.

3. Oggolaanshaha PHA ama Diidmada qeybta(guriga) ama Kiraynta

- A. Marka qoysku helo qeyb(guri) ku haboon halkaaa oo mulkiiluhu diyaar u yahay inuu ka qaybqaato barnaamijka, qoysku waa inay siyyaan PHA codsiga ogolaanshaha kirada (foomka ay keentay PHA), oo ay saxiixeen mulkiilaha iyo qoyska, iyo nuqul heshiiska ijarka, oo ay kamidiyihiin lifaaqa kireysiga ee ay qortay HUD. **Xusuusin: Labada dukumeenti waa in la siyyaa PHA ugu dambayn taariikhda dhicitaanka ee lagu sheegay qeybta 3 ama 4 ee sare ee bogga koowaad ee foojarkan.**
- B. Qoysku waa inay u soo gudbiyaan dukumeentiyadan habka ay u baahan tahay PHA. Siyaasadda PHA waxa laga yaabaa inay ka mamnuucdo qoyska inay soo gudbiyaan wax ka badan hal codsi oggolaansho kiraysi markiiba.
- C. Heshiisku waa inuu ku jiraan, erey-rey, dhammaan qodobbada dheeriga ah ee kirada ee ay u baahan tahay HUD oo ay bixiso PHA. Tan waxa lagu sameeyaa iyada oo lagu daro lifaaqa kirada HUD ee heshiiska uu isticmaalo mulkiilaha. Haddii uu jiro farqi u dhexeeya qodobbada dheeraadka ah ee kiraysiga HUD iyo wax kasta oo heshiiska kirada ah ee mulkiilaha, bixinta lifaaqa kiraysiga HUD waa in ay xukuntaa.
- D. Ka dib markii la helo codsiga ogolaanshaha kireysiga iyo nuqulka heshiiska, PHA ayaa kormeeri doonta qeybta(guriga). PHA lagama yaabo in ay siiso oggolaansho qoyska si ay u kireystaan qeybta(guriga) ama ay fuliyan heshiiska HAP ilaa PHA ay go'aamiso in dhammaan shuruudaha barnaamijka soo socda la buuxiyey: qeybta(guriga) ayaa ah mid qalma; qeybta waxaa kormeeyar PHA oo ay buuxisay heerarka tayada guryeynta (HQ); kiradu waa macquul; oo mulkiilaha iyo kiraystaha ayaa fuliyay heshiiska oo ay kamidiyihiin lifaaqa kiraysiga ee ay qortay HUD.
- E. Haddii PHA ay ogolaato qeybta(guriga), PHA waxay ogeysiin doontaa qoyska iyo mulkiilaha, waxayna siin doontaa laba nuqul oo heshiiska HAP ah milkiilaha.
 1. Mulkiilaha iyo qoysku waa inay fuliyaa heshiiska.
 2. Mulkiiluhu waa inuu sixiixaa labada nuqul ee heshiiska HAP oo waa inuu keenaa PHA nuqulka heshiiska kirada ee la fuliyay iyo labada nuqul ee heshiiska HAP ee la fuliyay.
 3. PHA waxay fulin doontaa heshiiska HAP oo waxay u soo celin doontaa nuqulka la fuliyay mulkiilaha.
- F. Haddii PHA ay go'aamisay in qeybta(guriga) ama heshiiska aan la oggolaan karin sabab kastaba ha ahaate, PHA waxay ogeysiin doontaa milkiilaha iyo qoyska in:
 1. Qeybta(guriga) la soo jeediyay ama heshiis kiro ayaa loo diiday sababo cayiman dartood, iyo
 2. Haddii shuruudaha u baahan diidmada loo xalliyo si ay ku qanacdo PHA ama ka hor taariikhda ay qeexday PHA, qeybta ama heshiiska kiraynta waa la ansixin doonaa.

4. Waajibaadka Qoyska

- A. Marka qaybta(guriga) qoyska la ogolaado oo heshiiska HAP la fuliyo, qoysku waa inay raacaan xeerarka hoos ku taxan si ay u sii wataan ka qaybqaadashada barnaamijka foojarka doorashada guriyenta.
- B. Qoyska waa in:
 1. Ay keenaan macluumaad kasta oo PHA ama HUD ay go'aansadeen inay lama huraan tahay oo ay kamidiyihiin caddaynta dhalashada ama xaaladda socdaalka, iyo macluumaadka loo isticmaalo dib u eegis jadwal joogto ah ama dib u eegis kumeelgaar ah oo dakhliga qoyska iyo intuu ka kooban yahay.

2. Ay shaaciyaan oo xaqijiyaan nambarada badqabka bulshada oo saxixaan oo soo gudbiyaan foomamka ogolaanshaha si loo helo macluumaadka.
 3. Ay keenaan macluumaad kasta oo ay codsato PHA si loo xaqijiyo in qoysku ku nool yahay qeybta(guriga) ama macluumaadka la xiriira maqnaanshaha qoyska ee qeybta.
 4. Ay si degdeg ah ugu ogeysiyaan qoraal PHA marka qoysku ka maqan yahay qeybta(guriga) muddo dheer si waafaqsan nidaamyada PHA.
 5. Ay u oggoladaan PHA inay baarto qeybta waqtio macquul ah iyo ogeysiis macquul ah ka dib.
 6. Ay qoraal ku ogeysiyaan PHA iyo mulkiilaha ka hor inta aanay ka bixin qaybta ama joojin heshiiska kirada.
 7. Ay u adeegsadaan qaybta(guriga) lagu caawihey in ay qoysku degaan. Qaybta qoondaynta waa inay noqotaa meesha keliya ee qoyska.
 8. Ay si degdeg ah ugu ogeysiyaan PHA qoraal ahaan dhalashada, korsashada, ama haynta ilmaha ee ay maxkamaddu bixisay.
 9. Ay ka codsadaan PHA ogolaansho qoraal ah si ay ugu darto xubin kale oo qoyska ka mid ah degane ahaan qeybta(guriga).
 10. Ay si degdeg ah ugu ogeysiyaan PHA qoraal haddii xubin qoyska ka mid ah aanu ku noolayn qeybta. Ay siiso PHA nuqluka ogeysiis kasta oo guri kasaarid ah ee mulkiilaha.
 11. Ay bixiso biilasha adeegga oo oo ay siiso oo ilaalso wixii qalab ah ee mulkiilaha aan looga baahnayn inuu ku bixiyo heshiiska kirada.
- C. Macluumaad kasta oo bixiyaan qoyska ay noqdaan kuwo run ah oo dhammaystiran.
- D. Qoyska (ay ku jiraan xubin kasta oo qoyska ka mid ah) waa inaysan:
1. Lahayn ama haysan wax dan ah oo qeybta(guriga) ah (marka laga reebo iskaashatooyinka, ama mulkiilaha guri-taagtaag ee heshiiska meel guri-taagtaag).
 2. Jebinin wax heshiis khatar ah ama soo noqnoqday.
 3. Samaynin khiyaamo, laaluush ama wax fal dambiyeed kale oo la xiriira barnaamijka.
 4. Gelin faldembiyeedka laxiriira daroogo ama faldembiyeedyo rabshado wata ama faldembiyeed kale oo khatar ku ah caafimaadka, badqabka ama xaqqa kunashaadka nabdoon ee dadka kale iyo dadka deggan agagaarka dhismaha.
 5. Siikireynin ama u oggolaan qeyb kale ama dhiibin heshiiska ama wareejisin qeybta.
 6. Helin caawinta guriyeynta barnaamijka foojarka ee doorashada guriyeynta iyadoo lahelayo caawin guri kale, isla qeyb ama qeyb kale oo hoos yimaada mid federaal ah, gobol, ama barnaamij caawinta guriyeynta maxalliga ah.
 7. Waxyeelo u gaysan qaybta ama dhismaha (marka laga reebo waxyeelada kasoo gaartay jeexjeexa ama jabaca caadiga ah) ama u ogolaanin wax marti ah inuu waxyeelleyo qaybta ama dhismaha.
 8. Helin caawinta guriyeynta barnaamijka foojarka ee doorashada guriyeynta markay daganyiin qeyb uu leeyahay waalidka, ilmaha, awoowaha, ilmo awoowe looyahay, walaasha, ama walaalka ee xubin qoyska ka tirsan, ilaa PHA ay go'aamiso (oo ay ogeysiiso milkiilaha iyo qoyska go'aankaas) in oggolaanshaha kiraynta qeybta, iyada oo aan loo eegin xiriirkaas, ay siinayso hoy macquul ah xubin qoyska ka mid ah oo ah qof naafio ah.
 9. U qaadan aalkolada si khatar ku ah caafimaadka, badqabka ama xaqqa kunashaadka nabdoon ee dadka kale iyo dadka deggan agagaarka dhismaha.

5. Takoorka Sharcidarrada ah

Haddii qoysku ay haystaan sabab ay ku rumaystaan in, raadinta guri ku habboon, lagu takooray da'da, jinsiga, midabka, diinta, jinsiga (ay ku jirto nooca galmaida iyo isku-araggaa jinsiga), naafio, asal qaran, ama qoys. Xaaladda, qoysku waxay u gudbin karaan cabasho takoorka guriyeyn Xafiiska Goobta HUD qof ahaan, boosta, ama telefoon. PHA waxay siin doontaa qoyska macluumaadka ku saabsan sida loo buuxiyo oo loo xareeyo cabasho.

6. Dhacidda iyo Kordhinta Foojarka

Foojarku waxa uu dhacayaa taariikhda lagu sheegay qeybta 3aad ee sare ee bogga koowaad ee foojarka ilaa qoysku codsado kordhin qoraal ah oo PHA ay ku siiso kordhin qoraal ah foojarka taaso ah in foojarku dhacayo taariikhda lagu sheegay qeybta 4aad. Go'aankeeda, PHA waxay ku siin kartaa codsiga qoyska hal ama kabadan oo ah kordhinta ee muddada hore.

Haddii qoysku u baahan yahay oo uu codsado kordhinta wakhtiga foojarka waqtiga hore si macquul ah, si waafaqsan qaybta 8 ee ciinwaankan, si barnaamijka looga dhigo mid uu heli karo xubin qoyska ka tirsan oo ah qof naafio ah, PHA waa inay kordhisaa wakhtiga foojarka. ilaa muddada si macquul ah oo looga baahan yahay ujeedadaas.